

Miisaaniyadda 2023: Sugidda mustaqbalka Alberta

Feb. 28, 2023

Miisaaniyadda cusub ee dowladda ee sanadka soo socda waxay dadka reer Alberta ka caawin doontaa kharashaadka, abuurista shaqooyin, horumarinta waxbarashada iyo adeegyada daryeelka caafimaadka, iyo ilaalinta ammaanka bulshooyinka.

Qorshaha ma bixin doono lacag ka badan inta ay rajaynayso Dawladdu.

"Mas'uuliyadda maaliyadeed waa muhim. Waxay fure u ahayd inaan gaarno mawqifkeenna maaliyadeed ee xooggan," ayuu yidhi Travis Toews, Wasiirka Maaliyadda ee Xukuumadda Alberta.

Miisaaniyaddu waxay hoos u dhigi doontaa kharashaadka qoysaska, iyada oo \$2.3 bilyan doolar lagu kharash gareynayo tallaabooyinka awood u helidda nolosha. Tan waxaa ku jira heerka dulsaarka hoose ee deynta ardayda, kabka qoysaska leh carruurta la korsado, mushahar kordhinta shaqaalaha qaybta adeegga bulshada iyo canshuur celin weyn oo deeqaha ah. hay'adaha samafalka.

Miisaaniyadda waxay lacag badan gelinaysaa dugsiyada si ay tirade ardayda fasallada u yareeyaan iyadoo la shaqaaleysiiyay ilaa 3,000 shaqaale dugsi oo dheeraad ah. Waxbarashada dusare, waxaa loogu talagalay \$111 milyan doolar oo kordhin saddex sano ah ay ka caawin doonto arday badan inay doortaan barnaamijyada inta badan loo baahan yahay, oo ay ku jiraan farsamada iyo ganacsiga.

Waxaa jiri doona \$59 milyan doolar oo loogu talagalay kumannaan kale ee xanaanada carruurta ah oo shati haysta iyo deeqo cusub oo la siinayo hawlwadeennada daryeelka carruurta iyo sidoo kale kabidda kharashka daryeelka carruurta ee waalidka.

Xiriirka xogaha

[Alberta.ca/Budget](https://alberta.ca/Budget)

Wediimaha warbaahinta

Charlotte Taillon

charlotte.taillon@gov.ab.ca

780-932-5381

Xoghayaha Warfaafinta, Guddiga

Maaliyadda iyo Keydadka

Lacag badan ayaa la bixin doonaa si loo kordhiyo badbaadada dadweynaha. Tan waxaa lagu qarash gareyn doonaa booliiska iyo adeegyada bulshada si loo caawiyo dadka qabatinka qaba inay ka soo kabtaan oo ay beddelaan noloshooda.

Dawladda waxay filaysaa inay hesho dakhli dhan \$70.7 bilyan doolar sanad xisaabeedka 2023-24. Dakhliga ka soo xarooda iibka kheyraadka aan la cusboonaysiin karin sida saliidda iyo gaasta, ayaa lagu qiyaasay 18.4 bilyan oo doolar.

Qorshayaasha miisaaniyadda waxa ay ku qarash garayn doonaan \$68.3 bilyan doolar sanad xisaabeedka, kaas oo bilaabmaya 1-da Abriil kuna dhammaan doona Maarso 31 ee sannadka soo socda. Lacag dheeri ah oo dhan \$2.4 bilyan doolar ayaa ka hari doonta dhamaadka sanad xisaabeedka..